



Dadka wax soo bandhigaya ee PPS iyo dad goobta ka hadlaya oo la qorsheeyay in ay ka qayb qaataan qadarinta Dr. Martin Luther King Jr.

Dugsiyada Dadweynaha Portland ayaa mar labaad soo bandhigi doonta qayb ka mid ah dhacdada degmada ee sanadlaha ee lagu qadarinayo Dr. Martin Luther King Jr. Qaybtii 34 ayaa la qaban doonaa Isniinta, Janaayo 21, iyada oo ka dhacaysa Xarunta Highland Christian, 7600 NE Glisan St. Dhacdada, oo lagu soo bandhigi doono bandhigyo dhanka dhijitalka ah, muusik iyo farshaxan, iyo dad kala duwan oo goobta ka hadlaya oo bulshada ka tirsan, wuxuu soconayaa 11 subaxnimo ilaa 6 galabnimo.

Curtis Wilson Jr., oo ah maamulaha Dugsiga Sare ee Benson, ayaa ka mid noqon doona dadka helaya Abaalmarinta Inta nolosha Qofka ka hartay. Sanadkii la soo dhaafay, Wilson, oo macallin ahaan uga soo shaqaysay PPS in ka badan 20 sanadood, ayaa [loo magacaabay Maamulaha Sanadka ee Dugsiyada Sare ee Oregon](#).

Barnaamijka waxaa ku jiri doona bandhig ay soo bandhigayaan Kooxda Qoob ka Ciyaarka Dugsiga Sare ee Jefferson, iyo sidoo kale kooxo ka kala socda dugsiyada dhexe ee Lane iyo Roseway, iyo Dugsiga Cesar Chavez. Ururka Ardayda Madow oo ka socda Dugsiga Sare ee Roosevelt ayaaa yeelan doona bandhig, iyada oo Nichole Watson, oo macallinka fasalka afaraad ka ah Dugsiga Hoose ee Rosa Parks uu imaan doono isaga oo matalaya Ururka Macallimiinta ee Portland.

Ka soo qayb galayaasha waxaa laga codsaday in ay ku deeqaan \$5 ama keenaan soo qaado shan waxyaabood oo ah cuntooyinka aan hore ka xumaan/halaabin .non-perishable', kuwaasi oo labadoodaba la geynayo goobta cuntada lagu kaydiyo ee degaanka. Barnaamijka waxaa sidoo kale laga baahin doonaa iyada oo la adeegsanayo warbaahinta bulshada, iyada oo lagala socon doono internet-ka. Wixii macluumaad ah ee la xiriira warbaahinta iyo in la arko sida ay dhacdadu iskugu xigxigto, fiiri [warqada xayaysiiska ee dhacdada](#).

Dugsiyada Dadweynaha Portland iyo Ururka Macallimiinta ee Portland waxay ka mid yihiin damaanad qaadayaasha dhacdada.